GARASHADA XUQUUQDAADA

Qoraalkaan waxaa loogu tala galay in oo kaa cawino xuquuqdaada goorta hay'adaha dowlada su'aalado ku weydiyaano. Waa inaa ka taxatirtaa qaabka aad kula hadleysid goorta qabilaysid sida Booliska, FBI, Laanta Socdaalka. Waa inaad la hadashaa qareen inta aadan ka jawaabin su'aaladaha. Haddii aad jawaab siisid waxay u isticmaali karaan kuwa kugu lid ah ama danbi. Laanta socdaalka ama Danbi Shacbi.

Si aad u ogaado xuquuqdaada la hadal qareenkaada. Sharciga ku saabsan dowlada xaqa u yeelashada inaa su'aasha way adag tahay inaa fahamto. Weerarka Sabteebar 11 ka dib, Saraagiisha dowlada is-bahaysiga waxaa la siiyey sharciyo cusub oo awood cusub siinaayo inay ku su'aalaan, ku xiraan, kuna haysan karaan. Sharciyo badan iyo kasas maxkamadeed ayey u baahan tahay la tartamaan. Saas darted, waxaa muhim ah in aad la hadaso qareenkaada si aad u ogaado xuquuqdaada. Haddii aad u malayneyso in lagu istaaji doono ama su'aalado lagu weydiinaayo, waa inaad haysataa magaca iyo nambarka taleefoonka qareenka.qaabilaayo wicitaankaada. Dadka aan laheen jinsiyada waxay u baahan yihiin sharci gaar ah oo halkaan ku soo sheegi doono. Qeybta I iyo qeybta II waa qof kastaba. Qeybta III waa dadka aan laheen jinsiyada. Qeybta IV ku saabsan tahay garoonka diyaarada. Talooyinkan ku siinayo micnaheedo ma'aha mid kaa reebayso in la iskaashatid baaritaanka kuwa sharciga hayaan

I. WAA MAXAY DASTUURKA XAQA U LEEYAHAY?

Xaq u yeelashada inaa aamustid Qodobka shanaad ee dastuurka U.S. wuxuu sheegayaa qof kasatba xaq u leedahay in ay ka jawaabin su'aaladaha ay weydiiyan hay'adaha dowlada. Su'aalada wey ku weydiin karaan laakiin makugu xiri karaan su'aalada ayuu diidday jawaabtooda. Laakin booliska, FBI way ka shakinayaa haddii jawaabta diido.

Xurnimad xaq baa u leedahay "Sababu macquul aheen laguma baari karo lagumana xiri karo" Sharciga Qodobka Afaraad ee kali ahaan shaha Without Warrant. Hayadaha dowlada ma baari karaan gurigaada ama xafiiskaada adigoo ogolaasho siin. Waxaa ku saxan tahay in aad u diido inay galaano. Laakiin xaladaha deg-dega ah (sida qof gargaar weydiisanaayo oo guriga ku jiro). Wakiilada wuu gali karaa wuuna baari karaa ogolaasho la'aantaada. Haddii lagu xiro gurigaada, wakiilka wuxuu baari karaa goobta iyo agagaarka "u dhaw" taas micnaheedo waxay tahay qolka aad joogto waqtiga lagu qabtay. Waxaana ogaadaa dowlada dabagal ku sameeyso E-mail, wicitaanka taleefoonka gacant iyo taleefoonka guriga adigoo cilmi ku laheen ama ogeen.

XAQ WAXAA U LEEDAHAY U DOODIDA BADALKA Qodobka Sharciga Koowaad wuxuu difaacaa kooxyaha iyo shaqsiyaada si nabadgalyo ah u doodo kana soo horjeestaan siyaasada dowlada. Laakin Maxkamada Sare U.S. waxay tiri laanta socdaalka bar-tilmaameed ah dadka jinsiyada laheen in la masaafuriyo maxaa yeelay howl-qabadka Qodobka Sharciga Kowaad. Haddii ay jiraano sababo kale oo lagu masaafuriyo. Taas micnaheedo waxay tahay laanta socdaalka waxay barta shiishka ka dhigan kartaa dadka fiisaha ka dhacay oo ay nacab yihiin sida ay u hadlaano, aragtidooda, iyo la xariirka kooxyaha iyo shaqsiyaadka.

II. MAXAA SAMEYNAA HADDII BOOLISKA IYO FBI ILA SOO XARIIRAAN?

S: Maxaa sameyaa haddii wakiilada wax I su'aalaan?
J: Xaq waxaa u leedahay inaa aamustid. Danbi ma'aha hadii su'aaladaha ka jawaabi weydo, laakiin diidmada jawaabta waxaa laga yaaba booliska inay kaa shakiyaan. Wadada ma lagugu xiri karo haddii aad diido in aad is-sheekto, laakiin haddii lagu joojiyo adigoo gaari wadeysid, waxaa kugu waajib ah in aad tustid laysinka iyo diiwaanka gaariga. Adigoo kula joogi qareenkaada ma loo baahno in aad la hadashid cid kale haddii horay laguu joojiyey ama laguu xiray. Qaaliga kaliyah ayaa amar ku bixin karo inaa ka jawaabto su'aaladaha.

S: Miyaa la hadle karaa qareenka?
J:Waxaa xaq u leedahay in aad la hadasho qareenka ka hor in aadan ka jawaabin su'aaladaha. Goorta aad tiraahdo waxaan rabaa in aan la hadlo qareen saraagiisha waa inay kaa joojiyaan su'aaladaha. Haddii aad go'aansato in aad la hadsho ciidamada sharciga fuliyo, waxaa xaq u leedahay qareenka inoo joogo goobta. Haddii aadan laheen qareen, waxaa u sheegaysaa sargaalka in aad rabto qareen ka hor in aadan ka jawaabin su'aaladaha. Haddii qareen leedahay hayso kaarka ganacsiyiisa, tusna sargaalka, weydiina inay kuu wacaano qreenkaada. Xasuuso inaa haysato magaca, hay'ada iyo nambarka taleefoonka baarayaasha ku soo booqdo adiga. Sii akhbaarta qareenkaada.

S: Miyee wakiilada baari karaan gurigeeya ama xafiiska?
J: Gurigaada ma baari karaan booliiska ama kuwa kale oo sharciga fuliyo ilaa ay ka haystaano ogolaashahaada ama Warqada baarista maxkamada. Ka soo hor-imaadka baarida ma joojineyso baaritaanka, waxaana loo malayaa in lagugu xiro arintaas. Taa waa mid xaqiiq ah haddii ay baaritaanka sharci daro yahay. Cida kula degan ama martida sharci ahaan way dhiibi karaan ogolaasho in la baaro gurigaada haddii booliska rumeysan yahay qofka awood u leh dhiibay ogolaashaha. Booliska iyo wakiilada sharciga fuliyo waxay u baahan yihiin baarida maxkamada.
Ay ku baarano xafiiskaada laakiin loo shaqeyaha wuu ogolaan karaa baarista xafiiskaada adigoo lagu weydiin fasax

S: Wakiilada waxay igu xireen gurigeeyga, miyee baari karaa gurigeyga?.
J: Goobta u dhaw halka lagugu xiray way baari karaan Baarid maxkamad la'aaneed laakiin gurigaada oo idil ma baari karaano ilaa ay ka haystaano baarist maxkamadeed si tafatiran u qeexaayo goobta la baaraayo, dadka, ama shayga la qabanaayo.
S: Maxaa sameyaa haddii wakiilada ay haystaan baarid maxkamadeed ?
J: Waxaa xaq u leedahay in aad aragtid baaris maxkamadeed. Baarida maxkamadeed waxay si cad u qeexaysaa goobta la baaraayo, iyo dadka ama shayga la qabanaayo. Haddii booliska haysto baaris maxkamad maka jooji kartid in ay galaano ama ay baaraano, laakin waxaa awood u leedahay in aad u sheektid baaritaanka ogoleen. Taas waxay yareyneesaa in ay baaraano qeybta awooda loo siiyey baarid maxkamad. Weydiiso haddii ay ku ogol yihiin baaritaanka in aad daawato. Waa inaa qaadataa qoraal sida magaca, nambarka aqoonsiga, wakiilada halka ay ka yimaadeen, qaar kale haddii ay joogaano marqaati u qaado. Qareenkaada u gudbi akhbaarahaada adiga iyo marqaatigaada.

S: Miyaa ka jawaabaa su'aaladaha booliska haddii ay haystaano Warqada baarista maxkamada?
J: Maya, waxay ku weydiin karaa su'aalado ka hor, inta baarida socoto ama ka dib. Warqada baarida maxkamada micnaheedo ma'aha in aad ka jawaabto su'aaladaha.

S: Maxaa sameynayaa haddii wakiilada aysan haysan Warqada baarida maxkamada?
J: Ha u ogolaan booliska in oo baaro gurigaada, hana ka jawaabin su'aaladaha. Diidmada ka jawaabida su'aaladaha iyo ogolaashaho la'aanta baarida aan laheen baarista maxkamada booliska ma u isticmaali karaan in ay ku helaano Warqada baarista maxkamada si ay kuu xiraano ama ay u baaraano gurigaada ama xafiiska.

S: Maxaa sameyaa haddii wakiilada aysan haysan Warqada baarista maxkamada laakiin ay ku adkeysteen inay baaraano gurigeeyga ka dib goorta u diiday?
J: Ficil ahaan ha uga hor imaan, hana ka hor-istaagin baarista, waxaa loo maahyaa in lagu xiro. Haddii ay tahay xataa baarid sharci aheen. Iskuday in aad u hesho marqaati goobtaas, una sheek baarista in aad ogoleen. Wakiilada ku baaraayo hel magacadooda iyo nambarka aqoonsiga. Haddii baarista la ogaado goor dambo in ay aheed mid sharci daro ah. Wixii cadayn ah oo laga helo xiliga baaristaa wax danbi ah mala soo oogi karo.

S: Si kastaba ha ahaato maxaan sameynayaa haddii aan la hadlay booliska?
J: Wax kastoo booliska u sheekto wuxuu u isticmaali karaa kuwo kugu lid ah adiga iyo dadka kale. Maskaxda ku haay beent u sheeka dowladadda waa danbi.

S: Maxaa sameynayaa haddii booliska igu joojiyo wadada?
J: Waxaa xaq u leedahay in aad weydiiso haddii aad xur u tahay inaad socotid. Haddii booliska ku yiraahdo malagu xirin, laakiin xur uma tihid inaa socoto. Taas waxay tahay "hayn". Haynto micnaheeda ma'ah waa lagu xiray. Booliska waxay taaban karaan dharkaada korkiisa haddii ay jiraano sababu ay ugu shakiyeen in aad haysato hub ama wax qatar ah. Haddii baarista intaa ka badan tahay si cad u dheh ma ogoli in baaritaan lagu sameeyo. Waxaana loo malayaa baaritaanka inay sii wadaan. Arinto si kastaba ha ahaato, ma loo baahno in aad ka jawaabto su'aaladahooda haddii lagu haayo ama lagu xiro.

S: Maxaan sameyna haddii booliska gaarigeyga istaajiyo?
J: Goorta lagaa codsado, tusi laysinkaada, diiwaanka iyo cadeynta caymiska. Adiga malihi ogolaasho baarista. Laakiin mararka qaarkood gaarigaada waa la baari karaa adigoo ogolaasho lagu weydiin haddii booliska sabab suuragal ah uu haayo

S:Maxaan sameeya haddii booliska ama FBI igu handadaan warqada marak-furka maxkamada haddii ka jawaabin su'aaladahooda?
J: Warqada marak-furka waa qoraal amar maxkamadeed ku faraayo inaa aado maxkamada si aad u cadeyso akhbaaraha aad haysid. Haddii booliska ama FBI kugu handadaano inay ku siinayaan warqadaas. Waa in la xariirta qareekaada si dhaqsi ah. Haddii aad la hadashid qareen la'aan way kaa faa'iisanayaan, hay'adaha fuliyo sharciga,waxaad u sheektana waxay u horseedaysaa inay ku waydiiyaano su'aalado fara badan. Haddii aadan la

hadasho waraaqda marag furka ka hor, waxaa xaq u leedahay inaa diido ka jawaabin su'aaladahooda. Waa in aad la kulantaa qareenkaada si aad u ogaato xaqaada.

S: Miyee qasab igu tahay in aan ka jawaabo su'aasha isla markii lay xabiso?
J: Maya, haddii lagu xabiso ma loo baahno inaad bixiso warbixin ama ka jawaabto su'aaladaha. Haddii lagu xiro oo aadan rabin in su'aaladaha ka jawaabto, waa inaa weydiisataa qareen isla markaa. Waxaa xaq u leedahay inaad ka jawaabin su'aaladaha ilaa aad kala hadashid qareenkaada.

S: Maxaa sameynayaa haddii booliska ama FBI ay I fiirinaayaan ama ay dabagal igu hayaano?
J: Waxaa xaq u leedahay inaad qaabilaad ku sameyso wakiilada aad tuhmeeyso si caro laheen goobaha dadweynaha. Waxaa weydiisa maxay sameynayan, waa inay kula socdaan marqaati. Qofkaa tuhum san tahay haddii jawaab ku siin weydo, qofkaa wuxuu ogaaday ugu yaraan in aad ogaaday cidda fiirineyso. Sharci daro ma'aha wakiilada fuliyo sharciyada inay adagsadaano qalabka sirdoonka goobaha dadwenaha laakiin haddii aad u fikireesid wakiilada dowlada inay ku daba-socdaan ama ay ku dhibaataynayaan, waa inaa lahadashaa qareenkaada.

S: Maxaa sameynaa haddii booliska ama FBI ila dhaqmaano si xun?
J: Xasuusnow wakiilka nambarka aqoosiga, magaca ama akhbaaro kale aad ku tilmaamaysid. Xaq waxaa u leedahay inaa weydiiso wakiilka akhbaarahan. Sida ugu dhaqsiyaha badan u qor wax kastaba, helna magacda, nambarka taleefoonka marqaatiga. Haddii lagu dhaawaco masir ka qaad halka dhaawaca ah sida ugu dhaqsimo badan ka dibna wac qreenkaada.

III. MAXAAN SAMEYNAYAA HADDII AAN AHEEN MAWAADIN INS ILA SOO XARIIRTA?

Cadeynta xuquuqdaada. Haddii aad weydiisan xuquuqdaa, uuna saxiixin waraaqadaha tanasul (siinta tanaasulka) Xuquuqdaada. INS waxaa loo malayaa in ay ku masaafiriso inta aadan arkin qareen maxkamada laanta socdaalka.

La hadal qareen. Markastaba hayso magaca, taleefoonka nambarka qareenka ka jawaabaayo wicitaankaada. Sharciyada socdaalka way adag yihiin sida loo fahmo, qorsho badan oo isbadel ahnaa socda sababtuna tahay dhacdada Sebteembar 11. Waxay u badan tahay badalaad badan la sameeyo.

Sal-dhig looga dhigay sharciga manta, qeynuunka iyo xeerka u degan INS, Jinsiyada dadka aan laheen xuquuqdooda way ka hooseeydaa, si kastoo ay tahay waraaqadaha laanta socdaalka aad haysatid. Akhbaarataan soo socdo waxa loo malaya in la badalo.

XASUUS MUHIM AH: *xuquuqdaa soo socoto waxay quseysaa dadka ajnaanibka ah jooga dalka U.S.. gudihiisa, ajaanibka wadamada kale oo joogo Xudduda (hawada circa ama dhulka) oo rabo in ay soo galaano U.S. Waxay leeyihiin qaynuun xadidan iyo xuquuqaan la mid aheen mawaadinka.*

Q: Miyaa xaq leeyahay in aan la hadlo qareen ka hor inta aan ka jawaabin su'aaladaha INS ama aan saxiixin waraaqadaha INS?
J: Inta badan haa, waxaa xaq u leedahay in aad wacdid qareenka ama qooskaada haddii lagu xiro, waxaana xaq u leedahay qareen ku soo booqdo goobta lagugu xiray. Waxaana xaq u leedahay qareen in oo kula joogo goorta dacwada mareesid ka hor inta hor joogsan qaaliga laanta socdaalka. Xaq uma lihid dowlada in ay kuu sameyso qareen. Waa inaa qareen kiraystaa ama raadsataa cid kale oo kaa wakiil ah lacag la'aan ah. Haddii aad u baahan tahay helitaan qareen, la xariir liiska kooxda mid ka mid ah warqadaan dhinaceeda dambe ku qoran.

S: Miyaa la iiga baahan yahay ka jawaabo su'aaladaha ku saabsan aqoonsiga laanta socdaalka haddii INS ay I joojiyaan?
J: Maya, waa u fasiri kartaa laanta socdaalka wakiilka INS haddii aad rabtid. Laakiin waxaa wanaagsan marka hore inaa la hadashid qareen. Haddii INS wax kaa weydiiso oo ku saabsan siyaasadaada, diintaada, kooxda ka tirsan tahay, waxyaabaha horay aad u tiri, goobaha ayaa u safar tagtay ama su'aalado kale aad u malayneeso inay xaq aheen ma loo baahno inaad ka jawaabto.

S: Miyaa qaataa Green Card ama waraaqadaha laanta socdaalka?
J: Haa, sharci ahaan waxaa loo baahan yahay markastaba inaa sidatid warqadaha rasmiga ah. Kuwaas waxaa ka mid ah Green Card, I-94, Employment Authorization Card, Border Crossing Card, iyo/ama waraaqadaha kale INS kuu ansixisay kana diwaankashan INS. Haddii waraaqadahaas haysan waxaa lagugu soo oogi karaa danbi fudud. Dowlada inta badan ma fuliso sharcigaas laakiin waqti kastaba waa la isticmaali karaa.

S: Haddii INS I xirto, laanta socdaalka awood ma u leeyihiin dacwad inay igu soo ogaan?
J:Haa, sharciga INS waa inay go'aan sadaan 48 saac gudahood in dacwadaada ay mariyaano laanta socdaalka, ama in xabsiga lagugu haayo ama rahbad laguugu daayo. Sharciga cusub, INS waxay leeyihiin "waqti suuro-gal ah oo dheeraad ah" kana badan 48 saac haddii ay jiraano "xaalad deg-deg ah ama dhacda lama filaan ah" waxay go'aansan karaan in lagugu haayo xabsiga ama lagaa fasaxo xabsiga.

Sharciga cusub oo la soo saaray INS u fasaxaayo dadka aan laheen jinsiyada in la haay karo todobo maalin ilaa dacwada marayaan. Haddii Xeer Ilaaliyaha Guud "cadeeyey" Qofka jinsiyada laheen oo yahay argagaxiso ama mid dhibaateyo nabadgalyada dalka. "Cadeeynta" la hayaha waxaa loo gudbinayaa maxkamada is-bahaysiga.

S: Miyaa xaq u leeyahay in aan weydiisto dacwadeeyda in rahbad laygu soo daayo?
J: Inta badan dacwadaha, waxaa xaq u leedahay in aad weydiisato in lagu soo daayo xabsiga goorta aad bixiso rahbada ama qaaliga laanta socdaalka ka hor weydiisato in lagugu soo daayo dacwad rahbad leh. Waxaa xaq u leedahay inkastoo ay weli INS dacwad kugu xukumin. Sharciga ma sheegaayo goorta dacwadaada oo qaadaayo qaaliga laanta socdaalka. Qaaliga wuxuu amri karaa in lagugu haayo xabsiga haddii qaaliga ogaado in halis u tahay bulshada ama aad baxsaneesid.Dacwooyinka qaarkood sharciga ma ogolaanaayo in qofka xabsiga laga daayo haddii lagu soo oogay argagaxsinimo ama danbiyo kale lagu xukumay.

S: Miyaa xaq u leeyahay dacwad maro ka hor qaaliga laanta socdaalka si aan isaga difaaco nafteeyda masaafuriska laygu xukumay?

J: Haa, dacwooyinka intooda badan, qaaliga laanta socdaalka ayaa xukumo masaafuriska, laakiin haddii xaqaada ka tanasusho "masaafuris iskaa u codsatid" (iskuna raacdeen inaa dhooftid) waa lagu masaafurinayaa dacwad la'aan. Haddii danbi lagugu xukumay, lagaana soo xiray xudduuda ama horay laguugu xukumay masaafuris, dacwad la'aan ayaa lagu masaafurinayaa.

S: Miyaa wici karaa qunsulka Haddii INS I xirto?
J: Ha ajnabiga lagu xiro U.S. xaq wuxuu u leeyahay in oo waco qunsulkiisa ama booliska u sheegaan qunsulkiisa in aad xiran tahy. Booliska waa in ay u ogolaadaan qunsulka soo booqdo ama ay kula hadal siiyaan. Qunsulkaada wuxuu kaa cawinaa in aad hesho qareen ama kaalmo kale. Waxaa kaloo xaq u leedahay in aad diido kaalmada qunsulkaada.

S: Maxaa dhici karo haddii aan ka tunaasulo xaq u leeyahay dacwada maro ama dalka ka dhoofo U.S. inta ay dacwadeeda dhamaan?
J: Waxaa lumineysaa xaqa u leedahay codsiga aqoonsiga laanta socdaalka. Waxayna kaloo kaa celinaysaa ku soo laabashada mustaqbilka dalka U.S. Waxay keeni kartaa dhibaatooyin halis ah, qaynuun ahaan dadka jinsiyada laheen. Inta aadan gaarin qo'aan ka hor marka hore la-tasho qareenka laanta socdaalka. Xataa haddii aad laheen deganaasho ama codsatay green card waa laguu diidi karaa soo laabashada. Dhoofaha sharci ku laheen laanta socdaalka joogana dibada muddo ka badan lix bilood waa loo diidi karaa dalka in oo ku soo laabto sanado badan inkastoo qofkaas diiwaan gashaneen laanta socdaalka.

S: Maxaan sameyaa haddii aan rabo in la xariiro INS?
J: Markastaba la hadal qareenk ka hor inta aad la xariirin INS (xataa talefoon) Wakiilo fara badan ee INS aragtida shaqadooda ugu weyn waxay "xoog ku fulin" mana kuu fasirayaan fursadaha aad leedahay.

Xasuusin gaar ah: Qofka aan laheen jinsiyada oo dhebane lagu dhibaateeyey arimaha qooska, waa inoo la

hadlaa qareen khabiir ku ah laanta socdaalka iyo dhibaateynta arimaha qooska.

MAXAY YIHIIN XUQUUQDA GAROONKA DAYUURADAHA?
XASUUSIN MUHIM AH: Waa sharci daro arimaha soo socdo lagugu sameeyo istaajin, fiirin, baarid, hayn iyadoo sal-dhig looga dhigo midabkaada, wadanka asalkaada, diinta, jinsi, ama asalkaada.

S: Haddii aan ku soo galo dukumeenti sax ah U.S. miye ijoojinaa oo lay baaraa Hay'ada Canshuurta U.S.?
J: Haa howlaha canshuurta waxay ka hortagayaan shayada sida mukhaadaraadka iyo hobka in lala soo galo. Waxayna xaq u leeyihiin inay joojiyaano ayna baaraano shay kastaba ama qofkastaba. Dukumeentiga sax ah makaa celinaayo su'aaladaha, baarida, xiritaanka, laakiin wuxuu kaa kaalmaynayaa in uu su'aaladaha kaa yareeyo.

S: Miyaa lay baari karaa aniga iyo boorsadeyda goorta aynu marno dhibaato la'aan baarista iyo waardiyaasha in aan ku jirin wax hub ah?
J: Waxaa ogolaatay baarista goorta aad soo goosatay tikitka soona aaday garuunka diyaaradaha. Laakiin xaq uma laha haddii baarista hore uusan jirin wax laga shakiyo. Goorta lagu baaro oo waardiyaha dhaafto ka dib ma lagu baari karo. Maxkamadaha way isku qilaafsan yihiin diidmada ama ogolaashaha baarista labaad, waana go'aansan kartaa inaa dhoofin oo garoonka ka baxdid.

S: Haddii aan ku jiro diyaaradda, shaqaalaha diyaaradda miyee handadi karaan ama ay ku weydiyaanoin aad ka degto diyaaradda?
J: Dooliyaha (Kabtanka) diyaaradda wuxuu xaq u leeyahay in oo diido rikaabka haddii aaminsan yahay rikaabka in oo dhibaataynaayo nabadgalyada duulimaadka. Go'aanka dooliyaha waa inoo leeyahay sabab macquul ah, sal-dhigna u ah aragtidiisa oo aheen malo.

AKHBAARAHA KALA XARIIR

Ameican Civil Liberties Union (ACLU): (212) 549-2500

American-Arab Anti-Discrimination Committee (ADC): (202) 244-2990

Asian American Legal Defense and Education Fund (AALDEF): (212) 966-5932

National Lawyers Guild – Post 9/11 Project: (212) 505-9119; **National Immigrant Project:** (617) 227-9727

U.S. Commission on Civil Rights (UCCR): (800) 552-6843

Muqaalka Jinsiyadeed waa goorta booliska, FBI ama hay'daha sharciga fuliyo ay ku istaajiyaan, su'aalado, baaritaan sabatuna tahay midabkaada, asalkaada, diintaada.
Haddii u malaysay in aad tahay dhibane muqaal jinsiyadeed. Soo wac **ACLU's Qadka lacag la'aanta 1-877-6-PROFILE** si aad u heshid foomanka

GARASHADA XUQUUQDAADA

Maxaynu Sameynaa Haddii Ay Istaajiyaan Booliska, FBI, INS Ama Hay'adaha Howlaha Canshuurta

Waxaa soo daabcay

ACLU

American Civil Liberties Union of Washington
705 Second Ave., Suite 300
Seattle, WA 98104

206/624-2184
www.aclu-wa.org

Qeybiyaha